

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Golaha Wakiiladda

Guddida Garsoorka, Dastuurka, Cadaalada & Xuquuqal Insaanka

**War-bixinta Guddida Kormeerka Xabsiyadda, Saldhigyada iyo
Maxkamadaha ee Afarta Magaalo
“BORAMA, HARGEISA, BER-BERA, BURCO & XABSIGA MANDHERA”**



Xubnaha Guddiga oo hortaagan xabsiga Borama

© 2011 House of Representatives



Jamhuuriyadda Somaliland

Golaha Wakiiladda

Guddida Garsoorka, Dastuurka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka ee Golaha Wakiiladda

Guddigu iyaga oo fulinaya waajibaadka uu faray Dastuurka Qaranka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, iyadoo sidoo kale ka duulaya muhiimada ah in la helo xog-dhab ah oo ku saabsan guud ahaan xabsiyada dalka, waaxda garsoorka iyo saldhigyada booliska, si loo sugo xaalada maxaabiista xidhan, garsoorka ay helaan, xad-gudubyada iyo gabood falada ka dhan ah xuquuqdooda, waxaa kale oo aanu rabnay in aanu wax ka ogaano nafaqada ay helaan maxaabiista iyo nadaafada xabsiyada ay ku xidhan yihiinba.

Haddaba Guddigu si ay u fuliyaan waajibaadkaas Qaran, waxaanu qorshaysanay hawlgal aanu ku kor-meerayno dhamaan xabsiyada, saldhigyada iyo waaxda garsoorka(maxkamadaha iyo xeerillaalinta) ee afarta gobol magaalo madaxyadooda sida Borama, Hargiesa, Berbera, Burco iyo xabsiga wayn ee Mandheera.

Si taas loo gaadho gudiga waxaa hagayey hawlgalkayagaas su'aalo aanu diyaarsanay (**Questioner**) oo aanu si siman u waydiinaynay masuuliyiinta xabsiyada, waaxda garsoorka iyo saldhigyada booliska ee goboladaas aan sare ku sheegnay.hawlgalkayagaas oo qaatay muddo (**14**) cisho ah oo ka bilaabantay

13.07.2011 ilaa **27.07.2011**. Waxaa gacan naga siiyey hayada caalamiga ah ee UNDP. Haddaba si aad u fahamtaan, suaalahii aanu diyaarsanay waxay u dhignaayeen sidan hoos ku cad oo kala gaargaar ah.

1. Xabsiyada

Waxaanu doonaynay in aanu si buuxda wax uga ogaano:-

- Guud ahaan maxaabiista xidhan tiradooda
- Tirada maxaabiista u xidhan Nabad-galyada, budhcad-Badeeda iyo siyaasada.
- Waxaa yool gaar ah aanu saarnay in aanu ogaano tiradda maxaabiista Rumaanka ah (**Remand Prisons**) ama garsugayaal ah ee xabsiyada afartaas gobol mudo dhaafka ku ah.
- In aanu ogaano sida loo kala ilaaliyo maxaabiista bukta iyo kuwa caafimadka qaba.
- In ay xabsiyadu leeyihiin qaybta caruurta (**Child Protection Unit**) ama dumarka lagu hayo.
- In ay daawo helaan iyo in ay dhakhaatiir u gaar ah leeyiin.

2. Saldhigyada Booliska

- Waxaanu si dhab ah u raadinaynay sidii aanu u ogaan lahayn maxaabiista saldhigyada ku xidhan ee mudo dhaafay.
- Tayada dambibaadhayaasha saldhigyada.
- Iyo Dooraka dambibaadhayaashu ku leeyihiin maxaabiista rumaanka ah ee xabsiyada ku raaga ama muddo dhaafka ku ah.

3. Xeer-ilaalinta

- Waxaanu rabnay in aanu sidoo kale ogaano, tayada xeer-ilaalinta.
- Iyo Dooraka ay ku leeyihiin maxabiista rumaanka ah ee mudo dhaaftay.

4. Maxkamadaha

- Waxaanu doonaynay in aanu wax ka ogaano qaybaha maxkamada ee badiba ka shaqeeya gobol kasta sida (**Ciqaabta, Madaniga, caruurta**) IWM.
 - Maamul ahaan maxkamadaha hoose cida ay hoos yimaadaan, xeerka nidaamka garsoorka ee shaqeeya, Maxkamadaha wareega baahida gobolada sida ay wax uga taraan.
 - Dadka muwaadiniinta ah ee gobolada jooga ee cadaalad daro ka cabanaya cida ay uga dacwoodaan waaxda garsoorka (**maxkamadaha iyo xeer –ilaalinta**).
 - in ay jiraan wax farogalin ah oo kaga yimaada maxkamadaha iyo xeerillaalinta xagga xukuumada, heer degmo, heer gobol ama mid qaran.
 - Dooraka ay garsoorayaashu ku leeyihiin maxaabiista rumaanka ah ee ku muddo dhaafay xabsiyada.
 - Guddiga cadaalada ee ah hay'ayada ugu saraysa maamulka garsoorka saamynta shaqo ee ay ku leeydahay hawlaha garsoorka ee goboladaas.
 - Dacwadaha tashiga lagu galo iyo Dacwadaha garsooraha kaliya ahi galo ta cadaalada u dhaw aragti ahaan.
5. Mudanayaal, Waxaa kale oo qorshaha noogu jirtay in aanu si guud u eegno baahiyaha kala gedisan hayadahaas aanu kormeeraynay ee ahaa xabsiyada, maxkamadaha iyo xeerillaalinta iyo saldhigyada booliska ee goboladaas.

Mudanayaal, markii aanu bilawnay hawlgalkiisi shaqo, anaga oo ka bilawnay magaalada Boorama, waxaa noo soo baxay arrimahan hoose:-

1. **Maxaabiista garsugayaasha ku ah xabsiyada waa sidan :**

A- Xabsiga Boorama maxabiista garsugayaasha ku ahi waa sidan (Remand prisoners);

- Gobolka (37) Waxaa ka mid ah. **Maxamed Ibraahim Saciid** oo xiran ilaa **11.01.2011**

- Degmo (4) Waxaa ka mid ah. **Dawladda Baaruud Ducaale** oo xidhan ilaa **01.06.2011**
- B- Xabsiga Hargeisa** maxabiista garsugayaasha ku ah.
- Gobolka (110) Waxaa ka mid ah. **Maxamed Nuur Xirsi.** oo xidhan ilaa **17.01.2010.**
 - Degmo (27) Waxaa ka mid ah. **Mawliid Xasan Jaamac.** oo xidhan ilaa **13.4.2011.**
 - Maxkamada Ciidamada waxaa garugayaal u ah (10) Maxbuus.wax ay xidhan yihiin ilaa **31.5.2011**
 - Maxkamada racfaanka .waxaa ka mid ah. **Maxamed Cali Jamac.** oo xidhan ilaa **27.3.2005**
 - Maxkamada Sare. Waxaa ka mid ah. **Bare Axmed Shirwac.** Oo xidhan ilaa **27.03.06**
 - Saldhigyada Hargiesha waxaa garsugayaal ku ahaa (18)maxbuus oo sidan oo sheegeen ay ka mid ahaayeen **laba gabdhood**, oo ka mid ah dumarkii shareska oo muddo ilaa 8 bilood ah ku jirey saldhiga new hargeisa,horena muddo sanad ah ku jirey xabsiga gabiley. Maxaabiistaas u xidhnaa gobol iyo degmaba .

D. Xabsiga Mandheera wax garsugayaal ku ah oo maxaabiis ahi ma jiraan.

E. Xabsiga Berbera waxaa garsugayaal ku ahaa wax muddo dhaaf ah malaha

- Gobol (10)
- Degmo (4)
- Racfaanka (3)

F. Xabsiga Burco waxaa garsugayaal ku ahaa

- Gobol (57) Waxaa ka mid ah, **Abdirahman Shide mire.** oo xidhan ilaa **12.7.08**
- Degmo (6) Waxaa ka mid ah, **Khadar Maxamed Quule.** oo xidhan ila **21.9.08**
- Laascaanod (2) Waxay kala yihiin **Faarax muse Jaamac iyo Cabdi Qaasim Bare** oo xidhan ilaa **26.12.2011 .**
- Xabsiga burco waxaa ku jira maxbuus magaciisa la yidhaaho **Cabdi Qaasim Maxamed** oo sanadii **2010** xabsigu ka dhamaaday oo ilaa hadda u xidhan magtii oo aan la bixinin.
- Waxaanu isagana ku aragnay oo xabsiga burco ku jira maxbuus **dhaawac fudud** ugu xidhan ilaa **11.05.2011.**

1. Si kastaba ha ahaatee,markii aanu derisnay, si gaar-gaar ahna aanu uga waraysanay mas'uuliyiinta booliska, dambi-baadhayasha, madaxda garsoorka sida(garsoorayaasha iyo xeer-ilaalinta), arrinta la xidhiidha maxaabiista xabsiyada ku muddo dhaafay ee garsugayaasha ah,waxaa noo soo baxday in ay dhamaantood wadaagaan masuuliyad daradaas dhacday.Waana xadgudub sharciyeed oo laga galay dadka muwaadiniinta ah ee garsugayaasha ah,waana arrin loo baahanyahay in aanay dib u dhicin.
2. Mudanayaal, waxaa kale oo noo soo baxday iyana arrin kale oo gobolada oo dhami ka siman yihiin oo ah dacwadaha madaniga ah. ee fulinta u bislaaday oo goaamadii fulintooda lala hor tuban yahay maxkamadaha haddii ay tahay mid degmo,gobol,racfaan ama sareeba.oo lala yahay ciddii fulin lahad,inkasta oo laleeyahay fulimahaas qaarkood waxay u dabran yahiin xagga nabadgelyada,waxaa jira in badan oo kale oo waxa ay u xanibanyihiin aan la garanayn
3. Mudanayaal, Intii aanu hawshan kormeerka ah ku maraynay maanu arag maxaabiis u xidhan gudiga nabad galyada marka laga reebo(1) maxbuus Boorama xabsigeeda ku xidhnaa oo magaciisa la yidhaa **Cabaas Maxamuud Xasan** .Muddada la soo xidhayna tahay **14-04-2010**, warkiisana naloogu sheegay in aan wax eeda ah loo haynin (**xeer ilaalinta, maxkamada iyo booliskuba**), Talana aanu ku bixinay in xoriyadiisa loo soo celiyo oo la sii daayo. Sidoo kale maanu arag wax maxaabiis ah oo u xidhan siyaasad ah haba yaratee.
4. Kormeerkayagan intii aanu ku jirnay maxabiista aanu ku aragnay xabsiga Hargiesa, mandheera iyo berbera waxaa ka mid ahaa maxaabista u xidahn budhcad-badeedka oo tiradoodu gaadhayso ilaa (26)oo dhamaantood ahaa maxaabiis aan u dhalan S.Land, marka laga reebo (1) maxbuus oo reer Somaliland ah oo Berbera ku xidhan, dhamaantood faldambiyeedka lagu soo eeddeeyey ee lagu ciqaabay ma ah mid lagu galay biyaha Somaliland , sidoo kale xeerka lagu ciqaabmariyey ma ha xeerka budhcad badeedka ee waa xeerka ciqaabta guud Somaliland.
5. Waxaa kale oo ay ka simin yihiin xabsiyada aanu kormeerka ku marnay waxay ku hayaan maxaabiis waalan oo maskaxda wax uga dhiman yihiin , oo qaar wax dilay iyo qaar qoon gaystay u kala baxaya oo aan loogu haynin xabsiga meel u gaar ah, oo aan loo haynin nafaqayn iyo daawayntoona , oo ay adagtahay sidii meel loogula hayn lahaayeen maxaabiista kale ee caadiga ah.
6. Dhamaan xabsiyadaas aanu kormeeray waa xabsiyo gaboobay,oo markii hore loogu talo galay heer degmo, markii dambena isu bedaley xabsiyo gobol ama gobolo . mugoodu aad u yaryahay oo nadaafadoodu aad u liidato.
7. Dhamaan xabsiyadu malaha qaybta caruurta iyo dumarka toona, marka laga reebo xabsiga mandheera oo hal qol oo caruurta ah leh, iyo burco oo hal qol oo yar oo dumarka ah leh mooyaane. Xataa xabsiga wayn ee cusub ee hargiesa malaha qaybta caruurta iyo dumarka toona, Sidoo kale dhismaha xabsiga hargaysa xagiisa sare oo dhan biyuhu magaadhaan.

Xabsiyadaasi dhamaantood waxay ka siman yihiin malaha meelo ciidanka xabsigu galo oo hoy u ah.

Mudanayaal, waxaa kale oo aanu xog-ogaal u noqonay oo kormeerkayagaasi noogu soo baxay oo aanu idiin soo gudbinaynaa idinkana.

- Maxkamadaha hoose oo ka kooban (Degmo, Gobol iyo Rafcaan), waxay maamul ahaan xagga maaliyada hoos tagaan Wasaarada Cadalada oo sharci ahaan dursanaysa madaxbanaanida waaxda garsoorka.
- Xeerka nidaamka garsoorka oo ah xeerka lagu maamulka garsoorka dalka, waxaa noo soo baxday in garsoorayaasha maxkamadaha kala gedisan ee goboladu, nuqulada ay haystaan ay yihiin qaar kala ged-gedisan oo aanu dhaqangelin xeerkaa ugu dambeeyey ee golaha baarlamaanka hadda joogaa ansixiyey. Dhamaan goboladu waan ay ka simin yihiin.
- Waxaa kale oo jirta oo ay afarta gobolba ka siman yihiin oo aanu cadaymahoodii haynaa in faragelin toos ah oo heer gobol iyo qaranba ah lagula kaco garsoorayaasha maxkamadaha kala gedisan ee gobolada. taas oo saamayn badan ku yeelatay shaqadooda iyo go'aan gaadhistoodaba.
- Qaybaha maxkamadaha ee gobolada ka hawlgalka ahi, marka laga reebo Hargiesa waa qaybaha Ciqaabta iyo Madaniga. Hargiesa waxaa u dheer qaybaha cashuuraha, Idaariga, iyo Caruurta oo aan aad u dhisnayn.etc
- Dhamaan maxkamadaha goboladu waxa ay ka siman yihiin in aanay gaadhin xeerarka dhaqangalka ah ee baaarlamaanku ansixiyey. Marka lagu daro xeerka caruurta iyo in aanay gobolada ka jirin maxkamada caruureed iyo boolis caruureed midnaba.
- Sidoo kale mudanayaal, waraysiyadii aanu qaadanay waxaanu ku ogaanay in muwaadiniinta gobolada ku nooli, hadii qof fal cadaalad darro ah ay garsoorayaashu ama xeer illaalintu ka gasho aanay jirin meel ama cid ay uga dacwoodan. Ka hargaysa iman karaana aanu ka helayn guddi cadaaladeed oo hawlgal ah oo uu u dacwoodo.

- Waxaa iyaduna noo soo baxay oo ay dhamaan war nagu masuuliyiinta waaxda garsoorka ee goboladu, in dacwadaha garsooraha kali ahi galo iyo dacwadaha tashiga lagu galo uu cadaalada uga dhawdahay dacwada tashiga lagu galo.
- Mudanayaal intaas marka aanu ka gudubno dhamaan xabsiyadda afartaas gobol iyo saldhigyadooda waxaanu kula kulanay tiro caruur ah oo lagu hayo, oo aan loo haynin meel gaar ah oo loogu talo galay laakiin madaxda xabsiyada iyo saldhigyada ku dadaalaan in ay meelo u sameeyeen.
- Magaalada Berbera iyo xabsigeeda waxaa u dheeraa oo markaas xabsiga ay ku hayaan **(25)** caruur ah oo aan u dhalan Somaliland oo ka yimid dalalka aynu jaarka nahay oo lagu soo xidhay dhaqan xumo aad u liidata kuwa kale ee magaalada joogaana ay la joogan, dhaqan xumadan oo wer-wer badan ku haysay mas'uuliyiinta gobolka.

Mudanayaal waxaa xusid mudan oo aan marnaba la ilaabin Karin duruufka adag ee guud ahaan ku xeeran hay'adaahaas aanu kormeerka ugu baxnay sida maxkamadaha, booliska iyo xabsiyada oo aan ahayn qaar laga sheekayn karayo. Gaar ahaan labadan meelood (BERBERA iyo MANDHEERA)

- 1- Berbera oo ah meel xeeb ah oo xiliyada qaarkood, gaar ahaan xagaaga oo ahayd xiligii aanu ku beeganay guud ahaan xaga nolosha iyo shaqadaba ku adag qofka shaqaalaha ah kuwa xabsiga ku jira iyo kuwa ka shaqaynayaba oo aad malayn karto sida ay u nool yihiin kuwaas oo u badan dad xaaslayda ah, caruur leh, oo intooda badani aanay meelo ay uga cararaan jirin, gar-gaar kalena aan haysan .waliba looga baahan yahay in ay shaqo qaran oo adag ka fuliyaan bayada noocaas ah.
 - Waxaanu war-bixinaha ku helnay in dawladii isticmaarka ee ingiriiska iyo xukuumadii ina cigaal ee xiligii Somaliland, ay il gaara ku eegi jireen guud ahaan shaqaalaha Berbera (siiba Booliska iyo ciidanka xabsiga Mandheera) oo la siin jiray guno yar oo ka dheeraad ka ah ciidamada kale.
 - Waxaanu kula kulanay maxkamadaha magaalada berbera, haddii ay tahay degmo, gobol iyo racfaanba. In Garsoorayaasha joogaa ay yihiin guddomiyayaasha oo kali ah, iyaga ayaa garsoorayaalna ka ah maxkamadaha, halkaasna waxaa ku baaqda wixii dacwad ah ee tashiga lagu geli lahaa oo dhan.

2- Xabsiga Mandheera waxa u weheliya laba arrimood oo kala ah :

- a) Biyaha lagu cabo xabsiga oo ah biyo qadhaadh oo barigii hore lagaga qaldi jiray biyo macaan, haddase aanay jirin biyo macaan oo ay iskaga daraan, oo ay isku soo baxsadeen keliya ah in ay cabaan biyaha qadhaadh oo dhibaato u gaysta caafimaadka ciidanka iyo maxaabiistaba.
- b) Mudanayaal, waxaa kale oo iyana jirta in xabsiga mandheera nalku ka bakhtiyo 10:00pm habeenimo, wakhtigaas inta ka dambeysana waxaa xabsiga lagu ilaaliyaa tooshash, xabsigaas tooshashka lagu ilaaliyo waxaa lagu hayaa maxaabiista ugu faraha badan ee dil sugayaasha ah, waxay khatar badan ku haysaa arrintaasi ciidanka xabsiga ka ilaaliya nabadgalyadooda.

3- Sidoo kale waxaa ka jirta xabsiga Burco iyo saldhigayadda Booliska ee magaalada Burco, berigii maamulkii hore ee ina-rayaale waxaa biilka nalka ka bixin jiray shirkadaha nalka Burco ee private-ka ah, biilka biyahana waxaa ka bixin jirey Dawlada Hoose ee magaalada Burco, waxaase dhacday markii maamulka cusub ee dawlada kulmiye la wareegtay talada dalka, waxaa joojiyey bixinta biilka biyaha Dawlada Hoose, waayo waxaa maamulka Wakaalada Biyaha la wareegtay Wasaarada Macdanta iyo Biyaha, waana magaalada oo kaliya ee aanu ku aragnay Wakaalada Biyaha oo hoos timaada maamulka Wasaarada Macdanta iyo Biyaha , markaas ayey ka baxeen shirkadihii biilkii nalka ay ka bixin jireen saldhigayda Booliska Burco.

Mudanayaal marka aan intaas ku dhaafno sida aan horeba idiinku sheegay waxaa kale oo kormeerkayga ka mid ahayd in aanu wax ka ogaano baahiyaha guud ee ciidanka Booliska, waaxda Garsoorka iyo xabsiyada magaalooyinkaas aanu booqanay.

Si kastaba ha ahaatee baahiyahaas aanu la kulanay ee hay'adahaas waxay ahaayeen sidan hoos ku qoran:-

1- Xabsiyada

Dhamaan afarta Gobol xabsiyada dalku waxay ka simanyihiin xaga baahiya guud:

- Dhamaan bulaacadaha iyo suuliyada waa qaar aad u liita oo wada fatahaya oo u baahan in bulaacado waaweyn loo qodo ama loo sameeyo baabuur si joogta ah uga qaada.
- Gaadiid la'aan, gaadiid xumi ama yaraan.
- Meelaha qaarkood ciidanka xabsiyadu malaha dirays.
- Ciidan yari ayey ka cabanayeen marka laga reebo xabsiga hargiesa.
- Qalab la'aan marka laga reebo xabsiga hargiesa.
- Dhamaan xabsiyadu waxay ay ka siman yihiin daawo la'aan.



2- Saldhigyada

Baahiyaha saldhigyada afarta gobol ee aanu kormeerka ku soo marnay:

Dhamaan saldhigyada afarta Gobol guud ahaan waxaa ay ka siman yihiin xagga baahiyaha guud.

- Xagga dhismayaasha waa qaar aad u yar-yar oo guud ahaan dayacan oo aan lagu hayn Karin dad dambiilayaal ah.
- Saldhigyadu guud ahaan waxaa ay ka cawdeen hawlaha ay hayaan iyo ciidanku in aanay is dabooli Karin.
- Qalab la'aan, sida katiinado, stationery iyo computer.
- Dhamaan waxaa ay ka siman yihiin shidaal yari ama shidaal la'aan, saldhigyada qaarkood waxaa shidaal yar ku caawiya oo ka bixiya dawladaha hoose.
- Saldhigyada bulaacadahooda iyo suuliyadooduba waa qaar aad u dayacan, taas oo sida ay noo sheegeen keeni karta caafimaad daro, waxaa kale oo aad u liita xaga nadaafadooda u baahan in si joogto ah loogu buufiyo cayayaanka ka dhasha nadaafada darada.
- Mudanayaal waxaa dhab ah in saldhigyada booliska tayada dambibaadhista ay qayb ka tahay, qalab xumida, shidaal yarida ama shidaal la'aan.



Maxkamadaha

Guud ahaan maxkamadaha afarta (4) gobol waxaa ay ka siman yihiin baahida guud

- Dhismaha maxkamadaha aad ayuu u liitaa gaar ahaan afartaa maxkamadood.
- Waxaa jira qalab la'aan aafaysay hawlmaalmeedka maxkamadaha oo ay ka siman yihiin.
- Xafiisyada xusuus dhawrka gebi ahaanba malaha maxkamadaha marka sanad dhamaadaba jawaano ayaa laysugu geeyee faylasha markaas ayaa meelahaas lagu daadidayaa.
- Guud ahaan waxaa ay ka siman yihiin gaadiid yari marka laga reebo hargeisa.
- Nabadgelyo daro ayaa haysata guud ahaan garsooreyaasha inta aanu ku aragnay afartan gobol.
- Waxaa jira kaaliyayaasha maxkamadaha **gobolka awdal** oo aan wax mushahar ah qaadan sida
 - **Maxkamada gobolka (1) kaaliye.**
 - **Maxkamada Degmada boorama (1) kaaliye.**
 - **Maxkamada degmada baki (1) kaaliye.**
 - **Maxkamada saylac (1) kaaliye.**

Gobolka Tog-dheer

- **Maxkamada rafcaanka (1) kaaliye.**
- **Maxkamada gobolka (1) kaaliye.**
- **Maxkamada degmada burco (1) kaaliye.**
- **Maxkamada caynaba (1) kaaliye.**

Mudanayaal waxaa kale oo hawshaas noo wehelineyey oo aanu ka soo qabanay afarta gobol ee kormeerayga ku sinaa, in marka aanu xabsiyada , saldhigayada magalaada iyo maxkamadaha, aanu soo marno ,in ay noo suurtagashay sida noo qorshaysnayd in aanu qabanqaabino casho ama qado kolba ta ku haboon goobtaas aanu joogno ama gobolkaas aanu joogno si aanu wada jir isugu keeno madaxda

xabsiga, booliska, maxkamadaha, mayor-ka iyo guddoomiyaha gobolka. Iyo madaxda kale ee gobolka ee aanu hawl uga baahano, oo ugu yaraan gobol walba noqonayey ilaa **25** masuul, ujeedada aanu madaxdaas isugu keenaynaya waxay ahayd.



In madaxdaas aanu u soo bandhigno waxyaabaha ama dhaliilaha aanu ku soo aragnay xabsiga saldhigyada ama maxkamadaha.

- In wixii talo ah aanu us oo jeedinayno madaxda gobolkaas
- in aanu waydiino wixii suaalo dheeraad ah ee aanu uga baahano madaxda iyo
- Ta ugu muhiimsan oo ahayd in wixii baahiyo yar-yar ee deg-deg ah ee aanu ku soo aragno goobahaas aanu soo maray ee u baahn in si degdeg ah wax looga qabto, ee aan sugi karahayn qaylo dhaantayada heer qaran. Taas oo afarta gobolba ay ka sinaayeen madaxdoodu gaar ahaan mayorada iyo guddoomiyayaasha gobolada ama ku xigeenadoodu kolba ka noo yimaada oo si sharafle nooga aqbalay, marka hore yeedhmada aanu u yeedhnay, marka labaadna si deg-deg ah oo xilkasnimo leh nooga aqbalay in ay wax ka qaban doonaan baahidaas aanu u soo bandhignay ee gobolkaas khuseeya.

Mudanayaal anaga oo warbixinyadu intaas ku kooban tahay waxaan doonaynaa in aan halkan idiinka sheego in ay hawl kale oo qorshaysan mustaqbalka dhaw.

In aan qabanqaabin doono saddex workshop oo uu mid yahay mid dib u eegis lagu samayn doono xeerka nidaamka garsoorka, si anaga oo ka tusaale qaadaynaya talooyinka aanu soo ururinay xeerkaas loogu biirin lahaa. Labada workshop ee kale oo iyana ah qaar heer qaran ah oo ujeedadoodu tahay sidii markii hore aanu gobol walba gudhiisa isugu yeedhnay, ayaanu doonaynaa in aanu isagu yeedhno dhamaan madaxda hayadahan ee gobolada dalka. si aanu ugu soo bandhigno macluumaadka aanu soo ururinay iyo sidii loo sixi lahaa dhamaan dhaliilaha jira. Hawlaha aanu ugu baxnay afartaas gobol waxaa sidaan horeba idiinku sheegnay naga gacan siiyey Hay'adda **UNDP**.

Waxaa kale oo mudanayaal noo qorshaysan in aanu labada gobol ee dhimana tagno sida ugu dhakhsaha badan. Taas oo ay naga taageeri doonto hay'adda **AWEPA**.

Mahad-Naq

- Waxaanu si aad ah ugu mahad-naqaynaa hay'addii hawsha gacanta naga siiyey ee UNDP oo aanay la'aanteed hawshani noo suurto gasheen.
- Dhamaan mas'uuliyiin kala gedisan ee gobolada nagu qaabilay, sida guddoomiyeyaasha gobolada iyo ku xigeenadooda .maayarada gobolada iyo ku xigeenadooda.
- Madaxda Maxkamadaha (Garsoorayasha, Xeer ilaaliyayaasha , madaxda xabsiyada iyo Madaxda Booliska).
- Waxaa kale oo aanu mahad u naqayanaa xubnaha guddiga ee sida xilkasnimada leh hawshan uga soo qayb qaatay.

**Soo jeedinta Guddiga Garsoorka, Dastuurka,
Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka ee
Golaha Wakiilada**

1. Waxaanu talo ku soo jeedinaynaa in dacwaduhu ay ku raagaan rumaanka taas oo wax u dhinta dabeecada cadaalada (**the nature of justice**) si taas looga badbaado waxaa waajib ah in dambi baadhista, xeer ilaalinta iyo garsoorayaasha maxkamaduhu iska kaashadaansidii looga bixilahaa arrinkaas.
2. Xukunada fulinta u bislaaday ee dhamaystay darajada maxkamadaha fulintoodu waa waajib, fulin la'aantooduna waxay keenaysaa in ay dadku ku fushadaan sharciga gacatooda oo garsoorka ka niyad jabaan, markaasna nabadgelyo daro ka imanayso, waxaa muhiim ah in fulintooda hay'addaha ku shaqada lihi iska kaashadaan.
3. Waxaa muhiim ah, in guddiga garsoorka, Cadaalada, Dastuurka iyo xuquuqal insaanka ee Golaha Wakiilada iyo waaxda garsoorka ee qaranku iska kaashadeen sidii dib u eegis loogu samayn lahaa xeerka nidaamka garsoorka oo marka horena aan si wanaagsan u dhaqan gelin, si loogu biiriyo nuxur badan oo nooga soo baxay hawlgalkaayagan.
4. Waxaanu u soo jeedinayaa madaxweynaha in uu hawlgeliyo xafiiska garyaqaanka guud ee qaranka is uu u guto waajibaadka ah in uu si dhab ah u faafiyo dhamaan xeerarka dhaqan galka ah ee golaha baarlamnku ansixiyey, loona gaadhsiiyo gobolada dalka oo dhan si loo daboolo baahida ka jirta.
5. Waxaa waajib qaran ah oo aanu u soo jeedinaynaa in xukuumadu. si degdeg ah u soo diyaariyo xeerarka budhcad badeeda iyo argagixisada, xeerarkaas oo hadda baahidoodu taagan tahay,ka dibna baarlamanka u soo gudbiyaan si ay u ansixiyaan.
6. Waxaaa jira arrin ku baahsan gobolada oo dhan kaas oo ah, farogalinta xukuumada ee maxkamadaha, hadday tahay heer Degmo, Gobol, Rafcaan iyo Sare-ba. Farogalintaas oo saamayn togan ku leh hawsha cadaalada Garsoorka ee ay garsoorayaashu hayaan. Sidaas-daraadeed waxaanu u soo jeedinaynaa xukuumadu in ay joojiso dhaqamada noocoos ah,oo ay sugto madax banaanida waaxda garsoorka.
7. Waxaa arrin dastuuri ah in maamulka waaxda garsoorka uu hoos yimaado guddiga cadaalada ee Qaranka taas oo sharicyan u xil saran guud ahaan maamulkeeda, sidaas darteed waxaanu madaxweynaha u soo jeedinaynaa in uu sharciga waafajiyo oo maamulka waaxdan ay faraha kala baxdo wasaarada cadaaladu oo ah hay'ad ka tirsan waaxda fulinta oo hadda gacanta ku haysa maamulka lacagta ee waaxda garsoorka.

8. Waxaa guddiga cadaalada ee qaranka waxaa waajib saran ah in ay si mas'uuliyadi ku jirto u gutaan xilkooda dastuurku u gaar yeelay .si ay mugdiga uga saran dhaliisha faraha badan ee agtaala.
9. Wasaarada cadaalada waxaa waajib ka saran yahay una soo jeedinaynaa, in ay si dhab ah u dhaqan geliyaan xeerka nidaamka garsoorka caruurta sharciga ku gefta, si loo diyaariyo dhismaha booliska caruurta, maxkamadaha caruurta iyo guud ahaan u hawlgalka diyaarinta loogu talo galay ubadkaas iyaga oo kaashanaya hay'addaha caalamiga ah ee hawlahaas ku foogan.
10. Waxaa waajib qaran ah oo xukuumada iyo hay'addaheeda qaran aanu u soo jeedinaynaa, in ay u hawlgalaan sidii loo tayeyn lahaa guud ahaan booliska gaar ahaan dambi baadhayaasha, xeer ilaalinta iyo garsoorayaasha maxkamadaha, si loo suuliyo cadaalad darada baahsan ee waaxda garsoorka ka jirta, hadii ay tahay xagga agabka ay ku shaqeeyaan, kordhinta aqoontooda iyo xaga isku xidhka wada shaqayntoodaba taasi oo muhiim u ah hawsha ay qaranka u hayaan.
11. Waxaa waajib qaran ah oo aanu u soo jeedinaynaa, in maxkamada sare iyo guddiga cadaalada qaranka ay dib u habayn ku sameeyaan maxkamadaha wareega si aysi mug leh wax uga taraan baahida guud ee gobolada dalka ka jirta iyagoo oo la kaashanaya hay'addaha caalimiga ah ee hawlahaas maalgaliya.
12. Waxaanu u soo jeedinaynaa in ay xukuumadu siyaasad cad ka diyaariso, dadka maskaxda ka jiran, ee guud ahaan gobolada dalka ku dayacan, gaar ahaan xabsiyada caadiga ah lagu hayo iyo sidii loo tayayn lahaa cusbitaaladoodii ama xabsiyadii u gaarka ahaa, si loogu daaweeyo looguna nafaqeeyo.
13. Mudanayaal, sidaan hore idiinku sheegay xabsiyada dalku waa xabsiyo la dhisay xiligii isticmaarkii oo markii la dhisayey talagalkoodu ahaa derajada xabsi degmo marka laga reebo xabsiga mandheera oo isagana maanta dhismihiisaha kala badh dunsanyahay, xabsiyada markii dambena iyaga oo aan dhisme ahaan kordhin ayaa laga dhigay heer gobol ama gobolo.

Haddaba xabsiyadu marka la qiimeeyo waa qaar duugoobay oo wada dumaya, mar labaadka mugoodu yaryahay, marka saddexaadna nidaamkooda oo dhami wada baaba'ay.

Sidaas-darteed waxaanu xukuumada u soo jeedinaynaa in inta suurtoogalka ah la dhiso xabsiyo cusub, kuwaas oo ay tahay in loogu talo galo qaybaha caruurta, dumarka iyo qabyta ciidanka illalada xabsigu dego. Xabsiga cusub ee hargiesa waxaa loo baahan yahay in la dhiso qaybihiisa Caruurta, Dumarka iyo ilaalada ciidanka xabsiga ee aan dhisnayn, isla markaasna la hagaajiyo system-kiisa aan shaqaynayn (Sida biyaha Bulaacadaha).

14. Waxaanu xukuumada iyo hay'addaheeda bahda cadaalada u soo jeedinaynaa in sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah wax looga qabto arrimaha warbixintan ku xusan, isla markaasna hoos ku sheegan oo ah arrimo daruuri ah.

1. Arrinta nalka iyo biyaha ee xabsiga iyo saldhigyada Burco in lagu celiyo Dawlada hoose bixinta biilka biyaha, shirkadaha laydhka ee gaarka loo leeyahayna lagu celiyo bixinta biilka korontada.
2. In sida ugu deg-deg badan ee suurto galka ah wax looga qabto arrinta gaarka u ah xabsiga magaalada Berbera iyo xabsiga Mandheera ee ah nalka iyo biyaha xabsiga iyo wax ka qabashada daruufaha guud ee ciidanka xabsiga mandheera, xabsiga Berbera iyo ciidanka booliska jira. Sida war-bixinta ku xusan.
3. Sidoo kale waxaanu u soo jeedinaynaa xukuumada in ay inta suurto galka ah wax ka qabato kaaliyayaasha maxkamadaha Gobolka Awdal iyo Tog-dheer ee aan mushaharka qaadan.

WAAD MAHADSANTIHIIN

*****©2011, Guddida Garsoorka, Cadaalada, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka ee Golaha Wakiilada*****
